
HLT
CAAFIMAADKA, WAXBARASHADA, BADQABKA
VÄSTERBOTTEN
HLT waxay doonaysaa inay waalidiinta iyo ilmaha siiso taageerada ugu wanaagsan ee suurtagalka ah.

# HLT ayaa sidaan tiri

**HLT waxay u taagan tahay Caafimaadka, Waxbarashada iyo Badqabka (ama Hälsa, Lärande och Trygghet afka Swedishka) waana iskaashi u dhexeeya waaxda caafimaadka, dugsiyada barbaarinta/dugsiyada caadiga ah iyo adeegyada bulshada. Ujeedada iskaashigu waa in la isku geeyo awoodaha si aan degdeg ugu bixino taageerada ugu macquulsan ee aan siinayno carruurteena iyo qoysaska u baahan caawimaada.**

Qoysas badan ayaa u baahan taageero dheeraad ah hadda iyo hadhoowba si ay u maareeyaan noloshooda. Waxaa laga yaabaa in dugsiga barbaarinta/dugsigu uusan u shaqaynayn sidii la rabay ama cunugaaga ayaa dhibaatooyin ku qabi kara saaxiibadiis. Waxaa sidoo kale jiri kara waxyaabo dhib badan oo ka jira guriga kuwaasoo saamaynaaya cunugaaga.

Waxaa jira qaabab kaladuwan, kuwaasoo carruurtu nagu tusaan in wax ay khaldan yihiin, sida inay caroodaan ama murugoodaan, inay qabaan madax xanuun ama calool xanuun, ama inay leeyihiin astaamaha walaaca ama walwalka. Ka waalid ahaan, way fududahay inaad niyad xumaato aadna ka xumaato in aan cunugaagu fayoobayn.

Waa wax badanaa dhacda in qoysasku ay xaalada noocaan ah galaan mararka qaar. Waalidiinta ayaa badanaa dareema inay awoodaan inay maareeyaan xaaladaha si iskood ah waxaana ku adag inay aqbalaan caawimaada dadka ka baxsan qoyska.

Laakiin khibrada ayaa muujinaysa in hadba sida ay qoysku xili hore caawimaad u helaan, ay gaari karaan isbadel wanaagsan oo degdeg ah. HLT ayaa ku siinaysa fursad aad ku helayso caawimaad iyo taageero la xariirta xaaladaada.

***"Waxaan doonaynaa inaad waqtiga ugu wanaagsan ee macquulka ah ka hesho dugsiga, guriga iyo xiligaaga fasaxa. Kamana caajiso doono ilaa aan gaarno yoolkaan."***



# La shaqaynta qoyskaaga ka koox ahaan

HLT waa iskaashi u dhexeeya waaxda caafimaadka, dugsiyada barbaarinta/dugsiyada guud iyo adeegyada bulshada waana sida qoys oo kale. Si wadajir ah, waxaan abuurnaa koox diirada saaraysa inay ku siiso taageerada aad u baahan tahay.

HLT waa koox dad ah oo leh xirfado iyo khibrado kaladuwan, sida macalimiin, la-taliyaal, shaqaalaha isku xirka qoyska, kalkaalisooyin ama dhakhaatiirta dhimirka. Waxaan ku dedaalaynaa inaan isku keeno koox dedaal badan oo ku siin kara adiga iyo qoyskaaga taageerada ugu muhiimsan.

Waxaad kala hadli kartaa kooxdeena xaalada qoyskaaga adoo niyad sami qaba maadaama wax kasta oo looga hadlo HLT ay keliya u dhexayn doonaan anaga iyo adiga.

Waan ku garab joogsan doonaa ilaa inta aad doonayso caawimaada aan kuu samaynaynana waa ikhtiyaarkaaga. Yoolku waa in isbadel wanaagsan loo abuuro adiga iyo qoyskaaga.

***"Waxaan helnay qof na dhagaysta oo baahida muhiimada siiya. Wuxuu awooday inuu na siiyo awood si aan u caawino ilmaheena."***

*"HLT ayaa u taagan qaar kamid ah arrimaha ugu muhiimsan xiliyada koriimada ilmaha: Caafimaadka, Waxbarashada iyo Badqabka."*



# Sida loola shaqeeyo HLT – talaabo-talaabo


Qof kasta oo ka shaqeeya xarunta barbaarinta/dugsiga ama daryeelka caafimaadka ama adeegyada bulshada ayaa ku siin kara taageerada HLT kadib marka uu kula tashto adiga.

HLT wuxuu ku biloowdaa kulaka gaaban ee qorsheynta si looga doodo waxa adiga iyo qoyskaagu aad doonaysaan. Marka qaabka kulanku waxtar leeyahay, waxaa lagugu casuumi doonaa kulan. Kulankaan, waxaan doonaynaa inaad noo sheegto waxa aad la dhibtonayso si aan qaab wada jir ah uga wada shaqayno waxa ku caawin kara.
Marka aad adeegsanayso HLT, waa muhiim in adiga iyo cunugaagu aad ka qaybgashaan hanaanka qorsheynta. Inta lagu jiro kulanka, waxaan qoreynaa qorshaha taageerada kaasoo aad ogoshahay.

Qorshehaan waxaa ku jiri kara taageerada waalidka, kulamada qoyska, isbadellada gaarka ah, daawaynada iyo xalalka kale ee waxtarka ah ee kugu haboon. Waxaan intaas kadib la socon doonaa qorshahaan si wadajir ah si aan u xaqiijino in hormar la sameeyo.

*“Anagoo haysana qorshe cad, waxaan xaqiijin doonaa inaan waxba khaldamin.”*

***“Waxaan arkay anoo dhib ku qaba noqoshada waalidkii aan rabay inaan noqdo, laakiin HLT ayaa i siisay dhiiri-gelin aan talaabo wanaagsan ku qaaday.”***



Waad nalasoo xariiri kartaa:

HLT
CAAFIMAADKA, WAXBARASHADA, BADQABKA
VÄSTERBOTTEN

**Caafimaadka, Waxbarashada, iyo Badqabka ka shaqeeya Västerbotten waa iskaashi u dhexeeya 15 magaallo iyo gobalka Västerbotten.**

Magaallada Bjurnholm
Magaallada Dorotea
Magaallada Lyckelse
Magaallada Malå
Magaallada Nordmaling
Magaallada Norsjö
Magaallada Robertsfors
Magaallada Skellefteå
Magaallada Sorsele
Magaallada Storuman
Magaallada Umeå
Magaallada Vilhelmina
Magaallada Vindeln
Magaallada Vännas
Magaallada Åsele